Embassy
of the Federal Republic of Germany
Nairobi

‘’DIB USOO SAARISTA” VISAHA QARANKA KA DIB SAAMEYNTA CUDURKA CAALAMIGA EE CAABUQA COVID 19

Haddii aad haysato fiiso qaran oo Jarmalka ah **“nooca D”** ah

- **Isukeenidda qoyska** iyo **ku aqal gelka Jarmalka**
- **Daraasadaha** ama **duruusta diyaarinta** (Studienkolleg)
- U **shaqeyso sidii qof ku takhasusay aqoonta** ama **shaqaalaha daryeelka caafimaadka**

kaasoo ansax ahaa 15-kii Maarso ama ka dib laakiin aad u safri weydey sababtuna tahay cudurka caalamiga ah ee caabuqa, 'Covid-19 ', waxaad hadda dalban kartaa ‘’dhib soo saarista fiisaha”.

Dib usoo saarista **wexeey suurtogal tahay haddii ujeedkaaga joogitaanka iyo meesha aad ku nooshahay ee Jarmalka uusan is beddelin** (e.g. Suuragal maahan haddii aad jaamacadaha bedesho waqtigaas).
Dib u soo saarista uma suurta gasho fiisaha qaran ee koorsada luuqaddaha muddada-dheer, Au Pair, Tabarucyada Ikhtiyaarka ah, booqashooyinka dugsiga, tababbarka ama tababarka shaqada (marka laga reebo shaqooyinka daryeelka caafimaadka).

Sida loo dalbado “dib u usoo saarista”

Fadlan emayl u dir visainfo@nair.auswaertiges-amt.de oo ay ku jiraan

- Magacaaga oo buuxa, taariikhda dhalashadaada iyo lambarkaaga baasaboorka
- Macluumaadka taariikhda aad rabto inaad gasho Jarmalka
- Sawir ama scan ka fiisihii laguusoo saaray
- Caymiska caafimaadka safarka 90-ka maalmood ee ugu horeeya muddada aad joogi rabtid (loogama baahna midowga qoyska oo la midoobo muwaadiniinta Jarmalka, qaxooti la aqoonsan yahay ama shakhsiyaad leh heerka ku-meelgaarka ah)
- Raacista dukumiintiyada loogu talagalay
    - Daraasadaha ama duruusta diyaarinta: Xaqiijinta jaamacadda in aad ku biiri karto daraasadahaaga iyo joogitaan kaaga shakhsi ahaaneed ee jaamacadda oo qasab ah
    - Shaqada: Xaqiijinta loo shaqeeyaha in qandaraaska wali la ansaxinayo, jiritaankaaga shaqsiyeed in looga baahan yahay goobtaada shaqada iyo in shaqadaada ay gabi ahaanba lagama maarmaan u tahay sababo dhaqaaled

Waxaan xaq u leenahay inaan codsano dukumiinti dheeraad ah haddii loo baahdo.

Dib u soo saaristu waa bilaash.

Mar haddii fiisada dib loo soo saari karo, waxaa lagaa codsan doonaa e-mayl ahaan, inaad baasaboorkaaga ku soo wareejisid qaybta fiisaha waqti cayiman. Baasaboorkaaga waxaa kaliya la aqbali doonaa wakhtiga ballantaas, baasaboorada la soo dhiibo iyada oo aan codsi cad laga helin dhinaceena la aqbali maayo. Waxaa suurtagal ah in qof kale kaa dhiibo baasaboorka asagoo adiga ku matalaaya; qofkaasi waa inuu tusaa warqad masuuliyad ah markuu keenayo baasaaboorka waqtiga balanta.

Fadlan Ogoow:
Codsiga 'dib-usoo saarista' wexeey keliya suurtagal tahay **illaa taariikhda 28. Ogast 2020** .Intaa ka dib, codsi cusub oo leh dukumiintiyo dhammaystiran ayaa loo baahan yahay iyo lacagta fiisaha caadiga ah.

Xaanshidan xaqiiqdu waxay ka tarjumaysaa xaalada sharci ee waqtiga la qorayay. Si joogto ah ayaa loo cusbooneysiiyaa laakiin sheegasho ma leh inay tahay isku-dhafnaan. Nooca awoodda leh ee waraaqda xaqiiqda waa nooca Jarmalka.